

Ogeysiiska Ogolaanshaha Dadban ee Waalidiinta (Passive Consent\*)  
Qorshaha Degmada Iskuulka ee Ra'yi Aruurinta Ardayda  
Ra'yi Aruurinta Ardayda Minnesota ee 2019

Degmadeena iskuulku waxay waydiineysaa ardayda fasalada 5, 8, 9 iyo 11 inay ka qayb-qaataan Minnesota Student Survey (MSS) (Ra'yi Aruurinta Ardayda Minnesota ee 2019). Sharciga Federaalku wuxuu nooga baahan yahay in aanu waalidiinta ku wargelino howshan iskuulka lagu samaynayo. MSS waxaa lagu qabtaa dugsiyada ku yaalla gobolka oo dhan saddexdii sanoba mar.

Su'aalaha kujira ra'yi aruurintan (survey) waxay ku saabsan yihiin mawduucyo badan oo la xiriira nolosha dhalinyarada. Ra'yi aruurintan waxay wax ka waydiinaysaa sida iskuulku u socdo, qorshahooda mustaqbalka, waxqabadyada wakhtiga iskuulka ka baxsan, caafimaadka jirka iyo maskaxda, xiriirka, isticmaalka maandooriyaha iyo waxyaabo kale.

Ardayda dugsiya sare waxaa la waydiinayaa wax ku saabsan hab-dhaqankooda la xiriira jinsiga. Macluumaadkan muhiimka ah ee ku saabsan fikirkooda iyo dabeecadahoodu wuxuu ka caawiyaa bulshada iyo iskuulada inay sameeyaan barnaamijyo wax ku ool ah oo ay bixiyaan adeegyo fiican.

Taariikhda (Taariikhaha) Minnesota Student Survey (MSS) la qaban doono waa: Feb. 22<sup>nd</sup> thru Feb. 28<sup>th</sup>.

Ra'yi aruurintani waa qarsoodi. Si looga hortago in la garto shakhsiyaadka ama goysaska, ardaydu ma sheegi doonaan magacyadooda, lambarka aqoonsiga ardayda ama macluumaad kale oo shakhsiyeed.

\*Ra'yi aruurintaan waa ikhtiyaari. Waxaad dooran kartaa in ilmahaagu uusan ka qayb-qaadanin sarfeeyga adiga oo soo buuxinaya oo soo celinaya foomka hoose. Ardaydu waxay sidoo kale diidi karaan in ay qaataan qayb ka mid ah ra'yi aruurintan ama ra'yi aruurinta oo dhan. Shaqaalaha ayaa ogaysiin doona inay taas dooran karaan.

-----  
Haddii aadan rabin in ilmahaagu qaato Minnesota Student Survey (Ra'yi Aruurinta Ardayda Minnesota), fadlan foomkan u soo celi: (name) ugu danbayn taariikhda ah: Feb. 19<sup>th</sup>

Magaca ardayga: \_\_\_\_\_ Fasalka: \_\_\_\_\_  
Iskuulka Ardayga: \_\_\_\_\_  
Magaca Waalidka/Mas'uulka (Fadlan qor:) \_\_\_\_\_  
Waxa aad u tahay ardayga: \_\_\_\_\_  
Saxiixa Waalidka/Mas'uulka: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_